

Tony Evers  
Governor



Kirsten L. Johnson  
Secretary

**State of Wisconsin**  
Department of Health Services

**DIVISION OF PUBLIC HEALTH**

1 WEST WILSON STREET  
PO BOX 2659  
MADISON WI 53701-2659

Telephone: 608-266-1251  
Fax: 608-267-2832  
TTY: 711 or 800-947-3529

Abril 2024

Salaan ka socota Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka), Division of Public Health (Qeybta Caafimaadka Dadweynaha), iyo Tobacco Prevention and Control Program (Barnaamijka Ka-hortegidda iyo Xakameynta Tubaakada). Waraaqdan waxaan u soo qoray waa in aan u mahadceliyo goobaha tubaakada iyo shiishadda ku iibiya Wisconsin ee ka taxaddara raacista sharciga Tubaakada ee federaalka ee ah ugu yaraan 21 jir ee gobolkeena.

**Sharciga da'da ugu yar ee wax lagu iibin karo ee federaalka ayaa ka sarreeya sharciyada Mareykanka ee ka duwan ee ka jira gobolka.** Sidaas ayaa ka jirta Wisconsin, oo sharciga tubaakada iyo shiishadda ee gobolka, oo ah 18 jir ma aha mid weli la cusbooneysiisay oo waafaqsan sharciga federaalka, oo ah 21 jir. Sida uu sharcigaasi dhigayo, goobaha Wisconsin ku iibiya tubaakada iyo/ama shiishadda, waxaa kasab ku ah in ay raacaan sharciga tubaakada federaalka ee ah 21 jirka.

**Food and Drug Administration (Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka ama FDA) ayaa kormeer ku sameysa goobaha da' yarta ka iibiya tubaakada ee Wisconsin.** FDA waxa ay sidoo kale ka shaqeysaa in ay dadweynaha u soo sheegto iibinta tubaakada ee da'da yar iyo/ama xayeysiiska khaldan iyo qoraalkooda, oo waxay sameeyaan booqasho qarsoodi ah in ay ku tagaan goobaha iibiya tubaakada. FDA waxay goobaha lagu helo jebinta sharciga ku ganaaxdaa lacag gaareysa \$10,000.

**Waxaan fileynaa in aad adiga iyo shaqaalahaagu fulisaan sharciga la rabo in aad mar kasta u raacdaan iibinta Tubaakada oo ah 21 jir.** Sababtaas awgeed, waxaan haynaa tababar lagu qaato barta internetka oo ah bilaash witobaccocheck.org oo aad ku baran kartaan da'da iibinta tubaakada ee sharciga ugu yar ee Wisconsin, ka dibna imtixaan tijaabo ah, iyo inaad ka

qaadataan shahaado. Sharciga gobolka Wisconsin ayaa tababarka ku khasabaya dadka iibiya tubaakada iyo shiishadda.

**Waxaan haynaa caawimaad bilaash ah oo dadka loogu sheego sharciga Tubaakada 21.**

Markaad booqato barta Wisconsin's Tobacco 21 oo ah [www.dhs.wisconsin.gov/tobacco/tobacco21](http://www.dhs.wisconsin.gov/tobacco/tobacco21), waxaad ka heleysaa faahfaahinta ololaha warbaahinta ee Wisconsin Tobacco 21, talooyin ku saabsan hubinta aqoonsiga leysanka darawalka, oo waxaad ka dalban kartaa calaamado, waraaqaha darbiga, iyo batoon bilaash ah oo aad dukaanka ku dhex xirataan adiga iyo shaqaalaha kale.

**Waxa ugu weyn waa da'da ay dadku ku bilaabaan isticmaalka tubaakada iyo nikotiinka.**

Dhallinyarada iyo dhallinta ayaa si gaar ah ugu nugul saameynta xun ee nikotiinku ku leeyahay caafimaadka iyo korriinka maskaxdooda, oo dhibaatooyinkaas waa kuwa la socon doona ilaa ay dhaafaan qaangaarnimada. Markaan wada shaqeyno, waxaan dadka Wisconsin ku caawineynaa nolol caafimaad leh, iyo nolol farxad leh.

Run ahaantii aad iyo aad ayaan ugu mahadcelineynaa wadashaqeynta goobaha iibiya tubaakada iyo shiishadda si balwadda looga ilaaliyo gacmaha dhallinyarada iyo dhallinta. Waxaad ku mahadsan tahay in aad hawshan qeybtaada ka qaadaneyso.

Mahadsanid,



Paula Tran  
State Health Officer and Administrator (Madaxa iyo Maamulaha Caafimaadka Gobolka)